

Booqashooyinka Onleenka ee Daryeelka Carruurta



Booqashooyinka waa la eegi doonaa oo dareen kala duwanaansho.

Gobolka Washington qaybta caruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska (DCYF) qaybta liisanku waxay u dhaqaaqday dhanka nidaamka sharci u hogaansanaanta oo gobolo badan ayaa bilaabay in ay qiimeeyaan kuwa kale iyaga oo u samaynaya booqashooyinka hab online ah.

Taas maxay micno adiga kuu samaynaysaa? Taas micnaheedu waxa weeyi xidhiidhka liisan bixiyahaagu wuxuu kula soo xidhiidhayaa ka hor booqashada waanu dhamaynayaa booqashadaada xataa adiga oo aan joogin "liisan bixiye lagu diyaariyay"

Waxa naga go'an in aan adeeg macmil oo ah kan ugu wanaagsan isla markaana wakhtigiisa ah siino bixiyaasha, caruurta iyo qoysaska aan u adeegno.

Ka dib markaad akhrido dhokumantigan, hadii aad haysto wax su'aalo ah oo dheeraad ah, fadlan hakala maag maagin in aad lasoo xidhiidho xafiiskaaga liisanka waxbarashada hore ee

daryeelka caruurta ee magalaadaada (www.dcyf.wa.gov/find-an-office/el-offices).

Ka hor booqashada:

- Shaqaalaha liisanku waxay la soo xidhiidhi doonaan bixiyaha si uu ugala hadlo waa maxay shayada uu bixiyuhu soo gudbin karo hab elektronik ah si uu hore ugu dhameeyo nidaamka booqashada online ka ah.
- Shaqaalaha liisanku waxay lasoo xidhiidhi doonaan bixiyaha si ay u go'aamiyaan meesha uu isticmaalayo (tusale ahan., Skype, Facetime, Zoom). Isla markaaba, shaqaalaha liisanku waxay waydiin su'aalaha sida:
 - Miyaa meeshu lagu shaqaynaayaa tahay meel wareegaysa mise meel la joogayo?
 - Waa sidee khadka internet-ku?
- Shaqaalaha liisanku waxay tixgalin doonaan rajooyinka iyo, isla markaaba, in bixiyuhu ogaado shaqaalaha liisanka celiyaal dihin iyo caqabadaha gaarka ah ee kaa saameeya xaga booqashada.
- Shaqaalaha liisanku waxay dib u eegi doonaan waxyaabaha fudaydinaya hawsha iyo macluumaadka shaqaalaha ee akoonka MERIT-ka ah.

Talooyinka hababka aad u fudaydin karto booqashada online ka ah.

Miyaad haystaa:

- Ma helaysaa agabka caawimada deg deg ah
- Heerkulbeeg lagu cabiro heerkulka biyaha (hadii la heli karo)
- Mastarad ama cajalad wax cabirta (hadii la heli karo)
- Shaqaale dheeraad ah ama xubno qoyska ah oo la heli karo si ay kuu caawiyaan
- Shaqaaluhu waxay duubayaan cusboonaysiinta MERIT
- Faylasha ilmaha iyo shaqaalaha waa in iyagoo diyaar ah la helaa
- Helitaanka macluumaadk Pet (haday ku haboontahay)
- Helitaanka macluumaadka isku socodka (hadii ay ku haboontahay)
- Qorshe daryeel caruured oo shaqsi ah hadii la heli karo, awoodo daawayn, maamul xaga daawada ah (hadii ay suuro galtahay)
- Kusoo dhaji/warqadaha yar yar ee xabagta leh gacanta
- Liisan bixiyuhu wuxuu soo diraa "qodobada hadalka" isagoo maamulaya booqashada markaa bixiyuhu wuxuu dib u eegi karaa oo uu diyaarsankaraa in uu su'aalo mawduuca ku saabsan waydiiyo hadii uu u baahdo.



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

Inta lagu gudo jiro booqashada:

- Shaqalaha liisanku waxay bilaabi doonaan booqashu in ay dhacdo wakhtigii loogu talagalay iyadoo ka dhacaysa meeshii loogu talagalay ee laysku raacay.
- Bixiyuhu "muujinaya" fudaydinta isagoo u maraya hab toos ah.
- Shaqaalaha liisanku waxay bixinayaan nasasho sida bixiyahaba.
- Hadii ay dhacaan wax kuwaas oo khalkhaliya ama rabsha booqashada, habayn ayaa la samayn doona si wakhti kale loo dhameeyo.

Talooyin caawimo leh

- Bixiyuhu wuxu dhigayaa taababka ama waraaqaha xabagta leh shayada la aqoonsaday in la saxo si uu mardambe usoo noqdo – si aanay u lumin qolka ama shayga laga wada hadlay. Iyadoo la isticmaalayo taabab iyo waraaqo, waxay bad baadin doontaa wakhti joojinaya dhokumantiga.
- Dhig agabka meel joogaysa si looga hortago dhaq dhaqaaqa kamarada.
- Isticmaal Zoom si aad u hesho muuqaal iyo wicitaan cod ah oo joogto ah.
- Ukala qaybi booqashada laba qaybood ama laba cisho; ilaali oo kor joogtee waraaqaha shaqada.
- Agabka hoos u dhig markaa liisanbixiyuhu waxa uu indha indhayn karaa qolka. Waxaad awood u leedahay in aad sugto hadii aad u baahato.

La soco:

Marka booqashada la dhameeyo, laysan bixiyaha wuxuu diyaarin doonaa waxyaabaha liiska fudaydinaya iyo warbixinta baadhista oo waxa uu iimayl ugu diri doonaa bixiyaha.

Hadii caawimo dheeraad ah oo farsamo loo baahdo ama caawin sharci taas oo loo baahanayahy in loo sharaxo bixiyaha meesha – iimayl lasocosho ah ama wicitaan telefoon ayaa loo habayn doonaa.

Hadii shayo aan sharci ahayn la saxo kuwaas oo u baahan in dib loo saxo – habayn ayaa loo samayn doonaa si loola socdo booqashad online ka ah si "loo dheehdo" sixitaanada. Waxa jira walaacyo isku mid ah kaas oo ka jira ka hor COVID-19 – wax aan dheeraad ahayn WAC. Dhawaan, inta badan goobaha caafimaadka iyo hubinta badqabka waa la hakiyay iyadoo ay ugu wacantahay xanuunka COVID-19.

Waxa jira qaar ka reeban oo booqashooyinkan waa lagu dhawaqi doonaa:

- Marka WAC loo nashqadeeyo Khatar deg deg ah hadii la helo sharci u hogaansanaan inta lagu gudo jiro maamulida booqashada.
- Isku darka iyo tirada WAC ee la helay sharci u hogaansanaanta sharciga waxay siyaadinaysaa khatarta daryeelka caruurta.
- Ma hayno wakhti cayiman marka Booqashooyinka caafimaadka iyo hubinta badqabka dib ugu soo noqon doonaan hawlihii caadiga ahaa.

Xaqiiqooyinka kale ee booqashooyinka liisamada online ka ah:

- Ma jirto wakhti ama habtoos ah taas oo booqashadu qaadanayso afar saacadood.
- labada dhinacba waxay haystaan doorashada ah in ay dib u mudeeyaan booqashada. Waxyaabaha qaar saamaynaya booqashada waxa ka mid ah lakin aan ku xadidnayn: korontada oo tagta, shaqaale yaraan, xaalada qoyska ama caruurta, tababarada iyo diyaargarawga la xidhiidha COVID-19, shirarka iyo waxyaabaha kale ee la xidhiidha COVID-19.

Doorashada ah in dib loo mudeeyo:

DCYF uma baahna afar saacadood oo booqasho online ah. DCYF way bad bali kartaa si ay u dhamayso booqashooyinka maalmaha kala duwan iyo wakhtiga ay dhinacyada oo dhami shaqaynayaan. Siyaabaha bixiyuhu uu ku doorankaro ama uu uga fogaan karo maamulida booqashada waxay noqon kartaa in dib loo mudeeyo oo ay ku jirto:

- Cilad xaga kombuyutarka ah
- Korontada oo tagta
- Shaqaale yaaran
- Xaaladaha qoyska ama cunuga kaas oo dalbanaya dareen gaar ah
- Tababarada iyo diyaargarawa la xidhiidha COVID-19
- Shirarka shaqaalaha caafimaadka ee gudaha ama adeegyada shuraakada iyagoo ka jawaabaya xanuunka COVID-19
- Kuwo kale (oo ay la socoto ansixinta DCYF)